DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBBALAND EE SOOMAALIYA

# Xeer-nidaamiyaha 11aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Mushaaraadka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

**Tusmo**

***1. Hordhac*** ........ ***1***
1.1. Awoodda, Hadafka iyo Baaxadda ........ 1
1.2. Mabaa'diida Hagaya ........ 1
1.3. Cidda lagu maamulayo ........ 1
1.4. Erey-bixinta ........ 2
***2. Baadi-sooca Darajada Mushaaraadka Jagooyinka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda*** ........ ***4***
***3. Mushaaraadka Aasaasiga ah ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda*** ........ ***5***
***4. Wax-ka-beddelka heerka mushaarka*** ........ ***6***
***5. Dhaqangalka*** ........ ***6***
***6. Cabashooyinka iyo Rafcaannada*** ........ ***6***
***7. Ansaxinta Xeer-nidaamiyaha*** ........ ***6***
**Lifaaqa 1aad: Shaxda Mushaaraadka Aasaasiga ah ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda** ........ **7**

# 1. Hordhac

1.1. Awoodda, Hadafka iyo Baaxadda

1.1.1. Xeer-nidaamiyahan waxaa la soo saarey iyada oo laga ambaqaadayo Qodobka 31[aad], Faqradda 31.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017[ka] ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

1.1.2. Xeer-nidaamiyahan waa "xeer la diidi karo" sida loogu qeexay Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 iyo si waafaqsan faqradda 1.4.1(f) iyada oo muddo aan ka badneyn toban (10) maalmood oo uu Baarlamaanku u haysto in si uu dib-u-eegis ugu sameeyo.

1.1.3. Xeer-nidaamiyahan waxaa uu abuurayaa nidaamyo iyo qaab-dhismeedyo ay yeeshaan mushaaraadka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ..

1.2. Mabaa'diida Hagaya

1.2.1. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa hagaya mabaa'diida naxariista, daah-furnaanta, bulsho-u-adeegga, iyo ixtiraamidda ku kala-dambeynta maamulka, daacadnimada, sirnimada, anshax hawleed, hufnaanta, waxtarka, xirfadlenimo, xaq ku shaqeyn, sinnaan iyo hababka ugu wanaagsan ee hawlqabadka.

1.2.2. Kheyraadka maaliyadeed ee loogu baahan yahay mushaaraadka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda/maamulka waa in laga bixiyaa Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

1.2.3. Xuquuqda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ay u leeyihiin in ay helaan mushaar joogto ah oo caqligal ah waa in loo ballanqaadaa si waafaqsan shuruudaha ay u dejiyeen Xeer-nidaamiyahan iyo Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda/Maamulka.

1.3. Cidda lagu maamulayo

1.3.1. Marka laga reebo sida hoos lagu cayimey, Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu maamulayaa shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee maamulka iyo maareynta ee waqti buuxa iyo kuwa waqti gaaban shaqeeya ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya oo mushaarkooda laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan.

1.3.2. Xeer-nidaamiyahan waxaa sidoo kale lagu maamulayaa shaqaalaha loo magacaabey jagooyin ka mid ah Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee maaliyaddoodu ay bixiyaan deeq-bixiyeyaal, sida ku xusan Qodobka 22[aad] ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017.

1.3.3. Xeer-nidaamiyahan laguma maamulayo:

a) Xubnaha ka tirsan ciidamada booliska, ciidamada amniga, ciidamada qalabka sida
b) Xubnaha garsoorka
c) Saraakiisha la doorto

d) Wasiirrada, Wasiir-ku-xigeennada iyo xubnaha Golayaasha ama Guddiyada uu magacaabo Madaxweynaha
e) Shaqaalaha sharikaadka ganacsi ee ay dowladdu leedahay oo u shaqeeya qaab ganacsi
f) Shaqaalaha loo qorto Qandaraasyo Muddo Go'an socda si ay u bixiyaan adeegyo xirfadeed kuwaas oo ah kuwo gaar ah oo ka madax-bannaan hay'adda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda
g) Shaqaalaha u shaqeeya qandaraasle ay dowladdu u qaadatey in uu bixiyo adeegyo..

1.4. Erey-bixinta

1.4.1. Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa, fasiraadahan soo socda ayaa la raacayaa;

a) "***Guddiga Rafcaanka***" waxaa loola jeedaa hay'adda uu Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah u magacaabo in ay dhegeysato rafcaannada ka dhanka ah ciqaabaha anshax-marinta ah ama cabashooyinka ka dhasha go'aamo ay gaartey Hay'ad Loo Shaqeeyo

b) ***"Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed"*** waxaa loola jeedaa qof u shaqeeya Hay'ad Loo Shaqeeyo oo mushaarkiisa laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Jubbaland sida uu dhigeyo Qodobka 4aad, Faqradda 4.1(e) ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017.

c) ***"Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda"*** waxaa loola jeedaa Shaqaalaha Rayidka ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladdu waxaa ay si waafaqsan qodobbada xeerkan u qabtaan dhammaan hawlaha fulinta iyo kuwa maamul iyo adeeg-bixin ee Dowladda.

d) ***"Guddiga"*** waxaa loola jeedaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ee lagu dhisey Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

e) ***"Madax-Waaxeed"*** waxaa loola jeedaa waax heerkeedu gaarsiisan yahay agaasime.

f) ***"Xeer la diidi karo"***waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiye uu Baarlamaanku u haysto muddo cayiman oo uu kaga soo horjeesan karo (diidi karo) ka hor inta *Xeer-nidaamuyuhu* dhaqangal noqon.

g) ***"Hay'ad Loo Shaqeeyo"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad, wakaalad ka tirsan Wasaarad, ama Guddi Madax-bannaan oo Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ka mid ah oo shaqaaleysta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

h) ***"Qof Shaqaale ah"*** waxaa loola jeedaa Qof Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed ah oo ay shaqaaleysatey Hay'ad Loo Shaqeeyo.

i) ***"Madaxa Hay'adda Loo Shaqeynayo"*** waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud (Xoghayaha Joogtada ah) ee Wasaarad ama sarkaalka gacanta ku haya hawlaha fulinta ee Hay'adda Loo

Shaqeynayo.

j) ***"Tilmaammo/amarro"***waxaa loola jeedaa xeerar, buugaag, amarro, dhabbe-tuseyaal iyo ogeysiisyo waxaana soo saara Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda oo u maraya Guddoomiyaha Guddiga. Tilmaamaha (amarrada) waxaa ay caadi ahaan ay tahay in islamarkaa ama waqti cayiman lagu fuliyo.

k) ***"Maareeye"*** waxaa loola jeedaa qofka sida tooska ah uu u hoos tago Qofka ka tirsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

l) ***"Wasaarad"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad ka mid ah Laanta Fulinta ee la dhisey iyada oo la raacayo dastuurka Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

m) ***"Xeer-nidaamiye"***waa *xeer la diidi karo* oo bixinaya xeerar faahfaahsan oo uu diyaariyo uuna soo saaro Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si loogu hawlgeliyo waxyaabaha uu dhigayo Xeerkan. Xeer-nidaamiyeyaashan waa kuwo ay waajib tahay in loo hoggaansamo laakiin ma aha Xeer uu soo saarey Baarlamaanka.

## 2. Baadi-sooca Darajada Mushaaraadka Jagooyinka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

2.1. Iyada oo la raacayo Faqradda 7.2 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017, si loo cayimo mushaarka aasaasiga ah, jagooyinka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa lagu baadi-soocayaa mid ka mid ah siddeeddan (8) darajo mushaar ee soo socda.

| **Heerka Darajada** | **Nooca Shaqada** | **Aqoonta looga baahan yahay** | **Tusaalayaal ka mid ah magacyada Shaqooyinka** |
|---|---|---|---|
| 1 | Shaqaale aan xirfad lahayn | Loogama baahna aqoon | Waardiye, Beer-walayaal (Jandiiniyeeri), Cunto-kariye Hoose, Nadiifiye, Fuundi, ilaaliye, Xamaali |
| 2 | Horjooge shaqaale | Wax akhrin kara oo waxna qori kara = | Madaxa Beerwalayaasha (Jandiyeeri Sare), Madaxa Cunto Kariyeyaasha, Madaxa Ilaaliyeyaasha, Darawal. |
| 3 | Shaqaale xirfad yar/aqoon maamul oo yar leh | Shahaaddo Dugsi Hoose/Dhexe | Cashuur-ururiye, Kaaliye Bare, Kaaliye Caafimaadka Guud |
| 4 | Karraani/Farsamo Yaqaan | Shahaaddo Dugsi Sare ama Diblooma | Karaanni, Kaashiyeeri, Xoghayn Xafiis, Xisaab-haye (*Bookkeeper),* Macallin Dugsi Hoose, Shaqaale Caafimaad oo Hoose, Shaqaalaha Hoose ee Waaxda Socdaalka |
| 5 | Karraani/Farsamo Yaqaan Sare | Shahaaddo Dugsi Sare ama Diblooma | Karraaniga Xogta, Sarkaalka Dakhliga ee Gobolka, Kaaliye Kastam 1, Xisaabiye Hoose, Kaaliye Waaxda Shaqaalaha, Macallin Dugsi Sare, Shaqaale Caafimaad oo Sare |
| 6 | Maareeye | Diblooma Sare, Diblooma ama Shahaado Jaamacadeed | Sarkaal Miisaaniyadeed, Sarkaal Kastan, Sarkaal Cashuur, Xisaabiye Sare (Khasnaji), Kaaliye Waaxda Shaqaalaha 2, Kormeere Garoon Diyaaradeed, Kormeere Dekadda, Maamule Dugsi |
| 7 | Agaasime/Hawl-wadeen Sare | Shahaado Jaamacadeed iyo waayo-aragnimo ku filan | Agaasime-Waaxeed |
| 8 | Agaasime Guud/ Hawl-wadeen Madax Ah/Xoghaye Joogto ah | Shahaaddada Koowaad ee Jaamacada iyo waayo-aragnimo ku filan . Shahaaddada Mastarka ayaa waxtar dheeri ah leh. | Agaasime Guud (Xogheye Joogto ah) |

2.2. Magacaabista siyaasiyiinta, magacaabista garsoorayaasha iyo xubnaha Guddiyada Madax-bannaan waa ay ka baxsan yihiin hannaanka darajooyinka Shaqaalaha

Rayidka ah ee Dowladda waxaana lagu saleeyaa habraacyo u gaar ah oo lagu xaddidayo mushaaraadkooda.

2.3. Baadi-soocidda mushaaraadka jagooyinka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee la ansaxiyey waa in lagu saleeyaa:

a. heerka mas'uuliyadda,

b. heerka waxbarashada aqooneed ama xirfadaha,

c. muddada waayo-aragnimada ee loo baahan yahay, iyo

d. Shuruudaha/xaaladaha shaqada.

2.4. Baadi-sooca jago lagu baadi-soocayo heerka darajada ku habboon waxaa lagu saleynayaa iyada oo tilmaanta qoran ee shaqada ee jagadaas la barbardhigayo tiro qeexido ah oo cayimaya heerka mas'uuliyadeed ee darajo kasta, aqoonta waxbarasho ama xirfadaha looga baahan yahay, waayo-aragnimada loo baahan yahay ee la xiriirta darajadaas, iyo shuruudaha/xaaladaha shaqada

2.5. Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ayaa mas'uul ka ah in jagooyinka shaqada ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda lagu kala baadi-sooco darajooyinka ku habboon si ku saleysan tilmaanta qoran ee shaqada.

# 3. <u>Mushaaraadka Aasaasiga ah ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda</u>

3.1. Iyada oo la raacayo faqradda 7.2 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda, mushaarka aasaasiga ah ee uu bishii qaato shaqaalaha waqti buuxa shaqeeya ee Heerka Darajo kasta waxaa loo kala cayimey sida lagu muujiyey **Lifaaqa 1$^{aad}$** ee Xeer-nidaamiyahan.

3.2. Nisbada/saamigalka mushaarka aasaasiga ah ee Heerka Darajada ee ugu hooseeya (Darjada 1$^{aad}$) uu ka yahay Heerka Darajada ee ugu sarreeya (Darjada 8$^{aad}$) waa in uu ahaadaa 1:8.6.

3.3. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee aan shaqeyneyn waqti buuxa waa in ay xaq u yeeshaan in la siiyo mushaarka aasaasiga ah ee Heerka Darajada jagadaas ee u dhigma saacadaha shaqo ee loo xilsaarey.

3.4. Sanad kasta oo ugu buuxsama waayo-aragnimo shaqo oo uu ku qaatey Heer Darajo, tobanka (10) sano ee ugu horreeya shaqaaleynta, Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa mushaarkiisa aasaasiga ah loo kordhinayaa boqolkiiba 1, taas oo ku xiran in uu si ku filan uga soo baxay xilka jagadaas. Shax tilmaameysa kororka mushaaraadka aasaasiga ah ee Heer Darajo kasta ayaa lagu muujiyey **Lifaaqa 2$^{aad}$**.

3.5. Tirada lacagaha kale ee gunnooyinka ama lacagaha kale ee gaarka ah ee dheeri ah ee laga yaabo in la siiyo Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda, ee aan ahayn mushaarkooda aasaasiga ah waxaa xeer-nidaamiyeyaal gaar ah ku go'aaminaya Golaha Wasiirrada.

## 4. Wax-ka-beddelka heerka mushaarka

4.1. Iyada oo la raacayo faqradda 20.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017, mushaaraadka lagu tilmaamey **Lifaaqa 1aad& 2aad** waxaa wax ka beddeli kara oo keliya Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda isaga oo u maraya wax-ka-beddel uu ku sameeyo Xeer-nidaamiyaha, si ku saleysan talo-bixinta uu ka helo Wasiirka Maaliyadda, kuna xisaabtamaya xaaladaha dhaqaale iyo kheyraadka miisaaniyadeed.

4.2. Wax-ka-beddelka lagu sameeyo heerarka mushaaraadka ee Heer Darajo kasta waxaa ay ahaanayaan kuwo mar walba ku saleysan nisbada/saamigalka mushaarka ugu hooseeya iyo kan ugu sarreeya.

## 5. Dhaqangalka

5.1. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee marka la dhaqangelinayo Xeer-nidaamiyahan uu mushaarkooda aasaasiga ah uu ka hooseyn lahaa lacagta dhiirrigelinta ah ee la siinayo ka hor inta uusan dhaqangelin Xeer-nidaamiyahan, waa in ay qaataan mushaarka ay hadda qaataan laakiin waa in aaney helin mushaar-kordhinta sanadlaha ah ee lagu siiyo waayo-aragnimada shaqo ee lagu sheegey faqradda 3.4 ee Xeer-nidaamiyahan.

## 6. Cabashooyinka iyo Rafcaannada

6.1. Qofka shaqaalaha ka tirsan ee aan ku qancin go'aan ay ka qaadatey Hay'adda uu u Shaqeeyo oo la xiriira arrimo ku saabsan shaqaalenimada qofka, ama amar ay siiyeen Maareeye ama Hay'ad Loo Shaqeeyo, waxaa uu Guddiga ka codsan karaa in uu baaro arrintan. Xubnaha Guddiga ayaa dhisaya Guddi Rafcaanno oo madax-bannaan oo eega kiiska oo ka soo bixiya fikir taageeraya Hay'adda Loo Shaqeeyo ama mid taageeraya Qofka Shaqaalaha ah. Haddii ay ku habboon tahay Guddigu waxaa uu cayimayaa tallaabo ay tahay in ay qaaddo Hay'adda Loo Shaqeeyo si ay wax uga qabato cabashada.

## 7. Ansaxinta Xeer-nidaamiyaha

7.1. Anniga oo adeegsanaya awoodaha ka Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland la igu siiyey Madaxa V, Qodobka 19aad, Faqradda 19.1 ee Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 iyo Madaxa VIII, Qaybta 33aad, Faqradda 33.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017, waxaan soo saarey Xeer-nidaamiyahan oo dhaqangelaya taariikhdan soo socota.



Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda
Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya

## LIFAAQA 1[AAD]: SHAXDA MUSHAARAADKA AASAASIGA AH EE SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DOWLADDA

| **Heerka Darajada** | **Nisbada (*Ratio*)** | **Mushaarka Aasaasiga ah ee Bishii (US$)** |
|---|---|---|
| **1** | 1 | 150 |
| **2** | 1.1 | 165 |
| **3** | 1.4 | 215 |
| **4** | 2.1 | 322 |
| **5** | 2.6 | 386 |
| **6** | 3.3 | 502 |
| **7** | 5.4 | 803 |
| **8** | 8.6 | 1,285 |

Lifaaqa 2[aad]: Shaxda Mushaaraadka Aasaasiga ah iyo Kororka Sanadlaha ah ee Waayo-aragnimada Shaqo

**Mushaarka billaha ee shaqaalaha waqti buuxa shaqeeya oo US$ ah.**

| Heerka Darajada | Nisbada uu ka yahay mushaarka ugu hooseeya | Boqolkiiba inta u kordheysa heer kasta | Sanadaha uu Ku Shaqeynayey Heerka Darada | | | | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | **0** | **1** | **2** | **3** | **0** | **5** | **6** | **7** | **0** | **9** | **10** |
| **1** | **1** | 0 | 150 | **1** | **1** | 0 | 150 | **1** | **1** | 0 | 150 | **1** | **1** |
| **2** | **1.1** | +10% | 165 | **2** | **1.1** | +10% | 165 | **2** | **1.1** | +10% | 165 | **2** | **1.1** |
| **3** | **1.4** | +30% | 215 | **3** | **1.4** | +30% | 215 | **3** | **1.4** | +30% | 215 | **3** | **1.4** |
| **4** | **2.1** | +50% | 322 | **4** | **2.1** | +50% | 322 | **4** | **2.1** | +50% | 322 | **4** | **2.1** |
| **5** | **2.6** | +20% | 386 | **5** | **2.6** | +20% | 386 | **5** | **2.6** | +20% | 386 | **5** | **2.6** |
| **6** | **3.3** | +30% | 502 | **6** | **3.3** | +30% | 502 | **6** | **3.3** | +30% | 502 | **6** | **3.3** |
| **7** | **5.4** | +60% | 803 | **7** | **5.4** | +60% | 803 | **7** | **5.4** | +60% | 803 | **7** | **5.4** |
| **8** | **8.6** | +60% | 1,285 | **8** | **8.6** | +60% | 1,285 | **8** | **8.6** | +60% | 1,285 | **8** | **8.6** |